



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Noofambar 30, 2021

Ku socota: Daryeel Bixiyayaasha iyo Hawl wadaagayaasha

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)

Ujeedada: Qiyaasaha tallaalka ee xoojinta ah waxaa heli kara qof kasta oo da'diisu tahay 18 iyo ka weyn

Maalinimadii Isniinta Xarumaha la Dagaalanka iyo ka Hortagga Cudurka (CDC) ayaa ku taliyay in qof kasta oo da'diisu tahay 18 iyo ka weyn ay tahay in uu qaato tallaalka xoojinta ah ee COVID-19.

Qiyaasaha tallaalka ee xoojinta ah waxay ka caawiyaan dadka in ay la dagaalamaan cudurka muddo dheer. Tallaalada xoojinta ayaa gaar ahaan lagula talinayaa dadka ka weyn 50 jir, dadka da'doodu tahay 18 jir iyo ka weyn ee ku nool goobaha daryeelka muddada fog iyo qof kasta oo qaatay tallaalka Johnson & Johnson. Dadka naafada ah iyo kuwa qaba xaalado caafimaad oo hoose ayaa sidoo kale lagu dhiirigelinayaa in ay qaataan tallaalka xoojin ah.

Dadka la tallaalay ayaa u qalma tallaalka xoojin ah 6 bilood ka dib marka ay dhammeystaan taxanahooda hore haddii ay qaateen tallaalka Pfizer ama Moderna, ama 2 bilood ka dib marka ay qaateen tallaalkooda Johnson & Johnson.

OHA ayaa leh [foomka taageerada farsamo](#) halkaasi oo daryeel bixiyayaasha, hay'adaha maamulka kiiska iyo dadku/qoysasku ay codsan karaan taageerada helitaanka tallaalka COVID-19, oo ay ku jiraan tallaalka xoojinta ah. Gaar ahaan, foomka waa in ay isticmaalaan

daryeel bixiyayaasha guryaha koox ahaanta loo degan yahay ee leh dad degan iyo shaqaale u baahan taageerada tallaalka, ama dadka helaya adeegyada guriga-dhexdiisa ee, sabab kasta ha ahaatee, aanan gurigooda ka bixi karin si ay u helaan tallaalka. Hay'adaha maamulka kiiska waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay foomka u buuxiyaan dadka ka tirsan adeegyada ee ay dhici karta in ay u baahdaan helitaanka tallaalka.

Akhri [xaqiiqooyin degdeg ah](#) ee Maamulka Caafimaadka Oregon ama booqo [bogga internet-ka ee tallaalkada xoojinta ah iyo qiyaasta tallaalka ee saddexaad](#) ee OHA wixii macluamad ah dheeraad ah.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.